

Duruusta Tallaabooyinkii Sheikh Madar ee aasaaska Hargeisa

Qormadii 8aad
Qalinkii Cabdirisaaq Caqli. (e-mail: cabdicaqli@hotmail.com).

Waxaynu qormadii hore ku soo sheegnay in Kabiir Khaliil (AHN), ardaydii uu tasawufka ku hagayey ku wargeliyay in Wilaayadii ama hogaankii uu ku wareejiyay Sheikh Madar (AHN), kuna adkeeyay ardaydii ay diinta wada baranayeen inay u hogaansamaan amaradiisa oo idil. Inkastoo qaar ka mid ah culimadii ay Sheikh Madar (AHN), tasawufka wada baranayeen ay markii hore saluugeen Wilaayadaasi lagu wareejiyay, hadana markii ay ka arkeen karaamooyin taageeraya hogaamintiisa ayey dhamaantood u hogaansameen oo ay wada dabagaleen. Arrinkaasi wuxuu inoo muujinayaa in Sheikh Madar (AHN) gaadhay heerkii ugu sareeyay ee jidka tasawufka ee lagu baranayey magaalda Harar. Waxaana muuqata in Alle cabsigiisu gaadhay heer sare oo Ilaahay ku dhow, qalbigiisana ay buuxiyeen maxabada iyo u hogaansanaanta Eebe. Taasoo dadkii la joogay ka arkeen karaamooyin badan oo ducadiisa Ilaahay degdeg u aqbalayo.

Sidaynu hore u soo sheegnay, waxaa suurto ah in hadalkii maldahnaa ee sarbeebta ahaa ee uu Kabiir Khalil ku tilmaamay xummad isaga haysa, uu micnaha runta ah ee uu ula jeeday ahayd masiibadii ka taagnayd dalka Somaliland ee ay sababayeen dagaaladii ka dhex aloosnaa bulshada Somaliland. Waxay taasi inoo iftiimaysaa in Sheikh Madar (AHN) loo xilsaaray in uu qaboojiyo oo uu wax ka qabto masiibooyinkii iyo dagaaladii ka dhex taagnaa dalka, noqdana hogaamiyihii dariiqada qadiriya ee dalka Somaliland.

Waxay taariikhda afka layskugu gudbiyo, ee laga soo xigtay dad kala duwan oo taariikh nololeedkii Sheikh Madar xogogaal u ahi inoo soo tebiyeen in “Awliyadii Harar joogtay shirtay markii ay dhibsadeen dagaaladii mudada badan ka socday dalka Somaliland. Waxaana shirkaasi lagu go’aamiyay in Sheikh Madar (AHN) noqdo hogaamiyaha hawshaasi u xilsaaran isagoo horkacaya culimada Soomaaliyeed ee Harar degan.”. Waxaa kale oo taageeraya hadaladaasi afka laynoogu soo tebiyay, qasiidooyin kala duwan oo loo tiriyay Sheikh Madar (AHN) oo tixo ka mid ahi sheegayaan micne la mid ah oo waafaqsan hadaladaasi. Si kasta arrinku ha ahaadee waxaa inoo muuqan kara in Sheikh Madar (AHN) loo xilsaaray in uu wax ka qabto dagaaladii ka aloosnaa Somaliland isagoo hogaaminaya culimo badan oo xilligaasi magaalada Harar diinta ka baranaysay.

Sida maantaba inoo muuqata, dadka Soomaaliyeed ee deggan dal kale, waxaa aad ugu xooganaada jacaylka ay u qabaan dalka iyo dadkoodaba. Waxaana qurbo joogta u caado ah in si xad dhaaf ah ay iskugu hawliyaan helitaanka wararka dalkii ay ka soo kicitimeen, kuna dadaalaan inay dalkooda iyo dadkoodaba wax taraan, ama taageeraanba. Haddii ay dalkooda soo waajahdo dhibaato ama dagaallo, waxay ku abuurtaa werwer dheeraad ah oo ka xooggan werwerka dadka dalka ku dhex nool haya. Taasoo ay ku dedaalaan sidii mushkiladaha jira loo soo afjari lahaa, iyagoo doodo iyo shirar kala duwan qaban qaabiya, wefdiyo soo dira, ama talooyin soo tebiyaba. Arrimahaasi ayaa taageeraya

wararkan inoo sheegaya in culimadii Harar deganayd ku shirtay magaaladaasi si dagaalada Somaliland ka socda loo soo afjaro.

Waxaa hadaba isweydiin mudan, maxay ahayd aragtida Sheikh Madar (AHN) ee ku wajahan arrinkaasi, muxuuna ahaa qorshaha uu ugu talo galay hawlgalkani uu ku doonayo inuu ku qaboojiyo dagaaladaasi? Si jawaabta su'aashaasi inoogu suurto gasho waxaa lagama maarmaan ah in aynu yara lafagurno saamaynta qurbuhu ku yeesho Soomaalida degan guud ahaan iyo fikradaha ku abuurma marka ay dal shisheeye ku noolyihiin. Waayo waxaynu ognahay in muddo ka badan 26 sano uu Sheikh Madar (AHN) ku noolaa magaalada Harar oo uu diinta ka baranayey. Inkastoo ay jireen Soomaali magaaladaasi degani, hadana waxay ahayd magaalo nolosheedu aad uga duwantahay bii'addii uu ku soo kacaamay, dadka ku noolina leeyihiin dhaqan gooniya iyo af gaar ah. Waxay Harar ahayd bii'ad magaalo oo dadku si joogto ah u deganyahay, dadka agagaarkeeda ku noolina yihiin beeralay dhulka tabcada.

Sida maantaba inoo muuqata, waxay qurbo joogta soomaaliyeed ee ku nool dalal shisheeye ku caan yihiin, in marka ay ku soo laabtaan dalkooda hooyo ay ku soo biiriyaan waayo aragnimadii ay soo arkeen mudadii ay qurbaha ku noolaayeen, kuna soo kordhiyaan dalkooda aqoontii ay soo korodhsadeen. Sanado badan ayuu Sheikh Madar (AHN) baranayey diinta Islaamka, isagoo si qotodheer u dhex muquurtay labada dhinac ee cilmiyada shariicada iyo tasawufkaba. Waana mid aynu arki karno in uu aad ugu helanaa sidii uu dadkiisa uga saari lahaa mugdiga aqoon la'aanta diintoodu ku abuurtay isagoo uga faaiidaynaya cilmiyadani uu mudada dheer baranayey.

Waxaa kale oo mudadii uu Harar deganaa arkay qaabka ay dadku dhulka u tabcadaan una beertaan iyagoo soo saaraya cuntadii ay cuni lahaayeen ama wax ku iibsan lahaayeen. Xilligaasi waxay dadka Somaliland ku nool oo idili dhaqan jireen xoolaha oo keliya, mana jirin dad beeralay ah oo wax beertaaba. Waxayna cuntadooda- wixii ka baxsan kuwa la xidhiidha xoolaha- ay ka soo iibsan jireen dibedda.

Waxaa intaasi dheer inuu soo arkay faaiidooyinka isweydaarsiga ganacsiga, shaqo abuurka, aqoon korodhsiga, wada noolaanshaha iyo horumarka ay leedahay magaaladu. Inkastoo xilligaasi ay jireen dakado badan oo dalka Somaliland ku yaalay, hadana waxay dekadahaasi xeebta ku yaalaa ahaayeen qaar aan si joogto ah loogu noolayn ee la iman jiray uun xilliyada jiilaalka, siiba marka ganacsi lays weydaarsanayo. Mana jirin magaalooyin la degan yahay oo dalka gudahiisa ka jiray. Waxaa jiray ceelal laga cabo oo la yimaado uun marka xoolaha laga waraabinayo ama laga dhaansanayo. Ceelalkaasi oo qabiilooyinku kala sheegan jireen may ahayn qaar la degan yahay ama ganacsi laysku weydaarsado.

Waxay arrimahaasi kor ku xusani inoo iftiiminayaan in Sheikh Madar u heelanaa sidii bulshadiisa uu uga hirgelin lahaa uguna soo kordhin lahaa dhul beerashada iyo wada deganaasho magaalo oo labaduba yihiin horumar dadkiisii ka maqan. Sidoo kale, wuxuu damacsanaa in uu bulshadiisa uga faaiideeyo aqoonta diineed ee uu mudada dheer baranayey. Waxaana suurto gal ah in uu rumaysnaa in haddii saddexdaasi arrimood la

wada hirgeliyo ay keeni karaan horumar, wax weyna ka tari doonaan nabadaynta bulshada Somaliland.

Waa mid inoo bidhaami karta in Sheikh Madar (AHN) ku gaashaanaa astaamo iyo aqoon kala duwan oo u sahli karta hawlgalkiisa bulshada Somaliland ku wajahan, ee uu doonayo inuu nabad ka dhex abuurto. Waayo marka hore wuxuu ahaa qof ka mid ah oo ku soo dhex barbaaray bulshadani. Ta labaadna wuxuu muddo aad u dheer baranayey cilmiyada kala duwan ee diinta ay rumaysanyihiin. Waxaa intaasi u sii dheeraa aqoonta dheeraadka ee uu ka korodhsaday kutubta kala duwan ee uu mudadaasi akhriyay iyo waayo-aragnimada uu ka helay bulsho ka duwan ta Somaalida ee uu in ka badan 26 sano ku dhex noolaa.

Ugu horreyn, wuxuu dhex muquurashadii cilmiga tasawufka ka helay Alle- cabsi aad u xooggan oo ay qalbigiisa, si jooqta ah, u hadheeyeen dikriga iyo xasuusta Ilaahay, weheliyeenna karaamooyin muujinaya ku dhawaanshaha iyo maxabada Ilaahay tiyoo dadkii ka ag dhowaa marar badan arkeen ducadiisa oo si deg deg ah Ilaahay uga aqbalay. Sifadaasina waa mid tixgelin iyo kalsooni weyn ku abuurta bulshooyinka reer guuraaga muslimiinta ee Soomaalidu ka midka tahay, marka ay arkaan qof Ilaahay ku mannaaystay sifadaasi.

Ta labaad, wuxuu cilmiga shariicada u lahaa aqoon qotodheer oo uu hab xikmadi ku dhafantahay ugu kala hufi karo mas'alahada diiniga ah ee ku wajahan bulshada Somaliland oo meelaha qaarkood ay adagtahay in laga hirgeliyo shariicada tiyoo ay ugu wacantahay maamul xukuumadeed oo aanay lahayn bulshadu.

Ta saddexaad, wuxuu ka hawlgalayey bulsho uu ku soo dhex barbaaray oo uu caadooyinkooda iyo dhaqankoodaba uu si xooggan u garanayo. Waxaa taasi u sii dheeraa aqoonta dheeraadka ah ee uu mudadii Harar ku baranayey diinta Islaamka ka soo helay, tiyoo barashada marxaladihii ugu horreeyay ee taariikhda Islaamku si dadban qofka baranaya ugu kordhinayso aqoonta bulshada Somaliland. Waayo bulshadii ugu horreysay ee Islaamku ku soo dhex kobcay waxay aad ugu dhaqan dhawayd bulshada Somaliland ee xilligaasi.

Waxaynu arki karnaa in mudadii uu Sheikh Madar (AHN) degganaa Harar, in barashada diinta ka sakow, uu isku hawliyay korodhsiga aqoono kala duwan oo kaabaya waxbarashadiisa diineed. Waxaana suurto ah in mudadaasi uu akhriyay kutub farabadan oo aqoonyahanno iyo qoraayo muslimiin ahi ama shisheeye ahi qoreen, kuna saabsan taariikhda muslimiinta, dhaqanka bulshooyinka muslimiinta, iyo cilmiyada kale ee saameeya nololaha iyo ilbaxnimada aduunkaba. Haddii aynu tusaale ka soo qaadanno mid ka mid ah kutubtii xilliyadaasi ku caanka ahayd dalalka muslimiinta oo uu qoray Ibnu Khaldun laguna magacaabo Al-Muqadima wuxuu si faahfaahsan uga sheekaynayaa dhaqanka iyo caadooyinka dadka reer guuraaga ah. Wuxuuna yidhi: ***“Dadka reer guuraaga ahi inkastoo ay leeyihiin astaamaha geesinimada iyo deeqda hadana waa dad dabcigoodu qallafsanyahay aadna u neceb oo la col ah maamul oo idil. Waxaa aad ugu xooggan casabiyadda iyo is urursi qabiilnimo oo badanaa ku***

abuura dagaallo dhexdooda ah. Way ku adagtahay in ay dhexdooda ka abuuraan maamul qabiilooyinka kala duwan ka dhexeeya oo kala haga. Cid kale oo isku dayda inay maamul u samaysana si xooggan ayey uga horyimaadaan”

Ugu danbayn, dariiqada qaadiriyada ee loo xilsaaray inuu Somaliland madax uga noqdo, kuna fidiyo, may ahayn mid ku cusub bulshada ee ilaa iyo qarnigii 15aad ee miilaadiga markii dariiqadaasi laga hirgeliyay Harar, waxay ahayd dariiqo dadweynaha Somaliland ku dhaqmo oo ay si fiican u garanayaan tusaalooyinkeeda.

Waxaa hadaba isweydiin mudan sida uu u bilaabay hawlgalkiisa iyo talaabooyinkii ugu horreeyay ee uu qaaday si qorshihiisa uu u hirgeliyo? Qormada soo socota ayaynu arrimahaasi gudo geli.

La socio salaasada danbe.